

Macluumaadka Maalinta Qalinjabinta ee Familada

Aad ayaan ugu faraxsanahay inaan kula dabaaldego guushan muhiimka ah. Qalinjabintu waa wakhti macno u leh ardaydeena, qoysaska, iyo bulshada. Si loo hubiyo badbaado, hufan, iyo waayo-aragnimo xusuus u leh qof walba, fadlan dib u eeg macluumaadka hoose.

Inta aadan imaan

- Albaabadu waxaa la furi doonaa 90 daqiiqo kahor inta aysan xafladu bilaamin. Waxaan kaa codsanaynaa inaad xili hore timaadid si aad u heshid gaadhiga meel aad dhigato, sido kale iyo meel aad fariisato
- Martida dhamaantood waa inay haystaan Ticket lagu galo xaflada
- Fadlan diyaarso Ticket-kaga markaad timaadid.

Gelida xaflada iyo badbaada loo bahanyahay

Si aan u taageerno badbaadada iyo xaflad qurux badan:

- Martida dhan waxay ka geli doonaan Albaabka weyn
- Wax bir ah lama ogola in lala galo gudaha, wixi hub ah iyo wixi qaylo sameen kara
- Bacaha la arki karo inay wax ku jiraa ayaa la ogolyahay in lala galo.
- Lama ogola buufin iyo ubaxyo in lala galo xaflada.

Arimahan waxay inoo hagaajin doonaan nidaamka iyo xaflada sido kale inaan helno meel aan ku dabaal degno ama space.

Fadhiga iyo imaanshaha waxa loo baahanyahay

- Martida waa inay fadhiistaan xaflada inta aysan bilaamin.
- Dadka gadaal ka yimid looma ogolaan doono inay soo xaflada weyn galaan. Hadii aad timid markay xaflada bilaamatay waxaa lagu ogolyahay inaad meel kale oo laga daawanayo xaflada aad gashid.

Inta lagu jiro Xaflada

Waxaan rabnaa qalinjebiyaasha inay farxadooda qaataan:

- In loo sacbiyo waan soo dhaweynaynaa marka loo yeedho qalinjebiye.
Laki waa in qaylada iyo sacabka koobnaado si loo maqlo qofwalba magaciisa.
- Fadlan ixtiraam u muuji familada iyo qalinjebiyaasha.
Carqaladayn waxay kugu keeni kartaa in laga saaro xaflada si ay u sii socota xaflada

Hadafkeenna

Hadafkeenna wuxuu yahay inaan sameeno Xaflad:

- Badbaado
- Ixtiraam
- Farxad
- Ku aadan qalin jebiye kasta

Waad ku mahadsantihin inaad noo qurxisaan xaflada sido kale ka dhigtaan maalin taariikhi ah una ah ardayda iyo familada.

Waxaan sugnaaba waa farxadiina.